

**Macluumaad loogu
talagalay
Shaqaalaha Muhaajiriinta
ah
ku saabsan Joogitaanka
Caafimaad iyo badbaado
leh
goobta shaqada**

Oktoobar 2020

Maamulka Caafimaadka iyo Badbaadada Shaqada



Maalin kasta, shaqaalaha ayaa lagu dhaawacaa shaqada. Laakiin ma ogtahay in labadiinaba adiga iyo cida aad u shaqaysaa ay door ku leeyihiin nabad galinta shaqadaada? Waxay noqon kartaa tan iyo markii aad timid Malta, inaad qabanayso shaqo aadan u baran, ama waxaa laga yaabaa inaad isticmaaleyso qalab ama mashiianno aadan waligaa horay u isticmaali jirin. Shaqada aad hada qabato sidoo kale waxay gabi ahaanba ka duwanaan kartaa shaqadii aad ka soo qabatay wadankaagii hooyo.

Malta gudaheeda, sharciga ugu weyn ee dadka ilaaliya xiliga shaqada ayaa loo yaqaan Sharciga Maamulka Caafimaadka iyo Badbaadada Shaqada. Sharcigan iyo qawaaniinta kaleba waxay ujiraan inay ka caawiyaan sidii goobaha shaqadu u noqon lahaayeen kuwo nabdoon iyo sidoo kale in shaqaalaha la siiyo xuquuq aasaasi ah (iyo waajibaadyo) si ay amaan ugu ahaadaan shaqada.

Waa ayo cida loogu talagaly Sharciga OHSA?

DHAMMAAN shaqaalaha jooga DHAMMAAN goobaha shaqada ee Malta iyo Gozo.

Tani waxay ka dhigan tahay marka laga reebo shaqaalaha waqtiga-buuxa iyo kuwa waqtiga-qeyb ahaan shaqeeya, dhammaan dadka kale ee shaqo qabanaya (xitaa saacado yar) waa la ilaaliyaa Waxa kale oo ku jira dhamaan goobaha shaqada sidaa darteed xitaa shaqaalaha guryaha ka shaqeeya iyo kuwa ka shaqeeya xanaaneynta dadka ayaa sidookale la ilaaliyaa.



Sideed ugu dhaawacmi kartaa ama ugu xanuunsan kartaa shaqada?

Waxaa jira siyaabo badan oo aad ugu dhaawacmi karto ama ugu xanuunsan karto shaqada. Aad bay muhiim u tahay in la xasuusto in haddii ay jirto khatar (haliso) inay suurogal tahay dhaawac ama jirro.

Tusaalooyinka qaarkood waxaa ka mid ah ka shaqeynta meelaha dhaadheer adigoon difaac lahayn, qabashada shaqo aan lagu tababarin inaad qabato, ka shaqeynta mashiinno ama qalab cusub, ku-sibiibixid dhul qoyan ama sibiibix ah, qaadista waxyaabo culus iyo ka shaqeynta kiimikooyin iyadoon jirin ilaalintii loo baahnaa. Dabcan waxaa jira tusaalooyin kale oo badan.

Muxuu shaqaaleysiyahaygu qabanayaa?

Sharci ahaan, loo shaqeeyayaasha oo dhami waa inay ilaaliyaan caafimaadka iyo badbaadada dhammaan shaqaalaha markasta. Intaa waxaa dheer, loo-shaqeeyahaagu waa inuu:

- Dhamaantiin idin siiyo **macluumaadka, kormeerka iyo tababarka** si loo hubiyo in caafimaadkaaga iyo amnigaaga shaqada la ilaaliyo.
- Kuu soo wargaliyaa wax kasta **khataraha** goobta shaqada oo qaado dhammaan taxaddarrada lagama maarmaanka u ah in lagu ilaaliyo.
- xaqiijyo in **habab badbaadada shaqada ah** ey jiraan iyo in la raaco.



- In uu ku siiyo **qalabka ilaalinta qofka** (sida suunka badbaadada, koofiyad adag, galoofyo, dhego xiraha) **si bilaash ah** markii loo baahdo.
- Hubsado in **mishiinada, aaladaha iyo qalabka ilaalin shaqsiyeed** si saxsan loo isticmaalo.



•Hubiyo in dhammaan **qalabka badbaadada** xaaladdiisu wanaagsan tahay oo si joogto ah loo ilaaliyo. Tani waxay khuseysaa labadaba qalabka ilaalinta shakhsi ahaaneed iyo ilaalada amniga ee qalabka iyo mishiinnada.

•La shaqeeyo **wakiilada caafimaadka iyo badbaadada shaqaalaha** kuwaas oo ay doortaan shaqaaluhu laftooda.

- Bixiyo **tas-hiilaadka daryeelka** oo ku filan(sida musqulaha, iwm).
- Tallaabo qaado si uu u xaddiddo ama uu uga fogaado baahida loo qabo **maaraynta xamuulka** kaasoo sababi kara dhaawac.
- Bixiyo marin **gargaarka degdegga ah**.
- Kuu soo sheegaa wax kasta **amarrada ama warbixinnada kormeerka** la xiriira caafimaadka iyo badbaadada oo ay soo saartay Hay'adda Caafimaadka iyo Badbaadada Shaqada.
- **Kuma eryi karo** diidmada shaqada aan amaansanayn.

Waajibaadyo sidee ah baa iga saaran?

Shaqaaale ahaan, waxaad sidokale leedahay mas'uuliyado laxiriira caafimaadka iyo badbaadada goobta shaqada. Xaqiiqdii, waa inaad:

- Ugu horayn **is ilaali** caafimaadkaaga iyo badbaadadaada iyo tan dadka kale ee ay saameyn ku yeelan karto shaqada aad qabato.
- **Adeegso qalabka badbaadada** (mid shaqsiyeed iyo mid mashiin iyo qalabba) oo loo shaqaaleysiyahaaga kuu sheego inaad isticmaasho.
- **La shaqee** loo shaqeeyahaaga, wakiilkaaga caafimaadka iyo badbaada iyo kormeeraha mashruuca (goobaha dhismaha) ee kusaabsan arrimaha caafimaadka iyo amniga.

- **U sheeg loo shaqeyahaaga ama kormeerahaaga** wixii ku saabsan qalab jajabay, mashiin ama wixii kale ee dhibaato nabadgelyo ah.
- **Ha isticmaalin** qalab ama makiinado waxyeellayn kara adiga ama shaqaalaha kale.
- **U dhaqan si masuuliyad leh** goobta shaqada.
- **Usoo sheeg khataraha aadka u daran** iyo ku xadgudubka sharciga OHSa loo shaqeyaha ama kormeeraha.



Maxay yihiin xuquuqda sharci ee aan leeyahay?

Marka loo eego Sharciga OHSa, waxaad xaq u leedahay inaad:

- Wax ka ogaato wixii khatar caafimaad iyo badbaado ee goobtaada shaqada ah.
- Kaqeybgalida ka yeelida in lagu ilaaliyo goobta shaqada mid amaan iyo caafimaad qabta.
- Diido shaqada aan amaansanayn.
- Awood u leedahay inaad ka shaqeyso goob amaan ah oo caafimaad leh, adigoo ka baqayn rabshad ama dhibaateyn.

XAGEE KA HELI KARAA MACLUUMAAD DHEERAAD AH?

Waxaad kala xiriiri kartaa Maamulka Caafimaadka iyo Badbaadada Shaqada (OHSa) wixii walaac ah iyo weydiimo aad ka qabto caafimaadka iyo badbaadada goobta shaqada. Ku kalsoonow sir buuxda - umana sheegeyno shaqo-bixiyeyaasha cida cabashada soo jeedisay ama na waydisay inaan baarno. Intaa waxaa dheer, waxaad sidoo kale nagula soo xiriiri kartaa hab aan lagaraneyn.

Sideen ula xiriiri karaa OHSa?

OHSa waxaa lagula xiriiri karaa qaabab kala duwan.

Cinwaanka: 17, Triq Edgar Ferro, Pietá PTA 1533, Malta

Lambarka taleefanka: 21247677

Saadaha shaqada kadib iyo xaaladaha degdegga ah: 99496786

Email: ohsa@gov.mt

Facebook: OHSa Malta

Soodejiso Appka moobilka oo bilaashka ah ee BSafe @ Work

